

FAAFINTA

RASMIGA

الرسمية



الجريدة

JAMHURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMALIYA

الجمهورية الصومالية

Sannadka 11aad Muqdisho 2 Maajo 1983 L. 5

FAAHFAAHIN BIL SOO BAXA

جريدة شهرية

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S. QILMADU waa 5 Shiln lambar waliba—RUKUNKA: Sannadii waa Shs. 100 Somaliya gudaheeda—dibaddeedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaa bmaa 1 Janayo Qiimaha qoritaanku F.R. halkii sadar iyo waxoo **ka** yar waa 2 laba Sh.—Rukunka iyo qoritaanka waxua a weydfistaa laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah—lacagta waxaa lagu bixinayaan Xafiiska Canshuuraha ee Wasaa radda Lacagta.

K O O B N I I N

QAYBTA

KOOWAAD

SHARCI

SHARCI L. 4 ee 19 Abr. 1983, U rogid Sharci
“Xeer Sharci lam. 1 ee 1 Maarsa 1983,
kuna saabsan wax ka beddelid Tacrii- BOG. 233
fada Furdada.”

QAYBTA

LABAAD

XEER

XEER SHARCI L. 3 ee Maarsa 1983, Wax
ku Darid Sharci hawlah Difaaca
Qaranka (Sharci Lam. 32 ee 28 Abr. 81. » 234

XEER MADAXWEYNHA JDS, L. 10 ee
2 Abr. 1983, Heshiis Guud ee Iskaashi
Dhaqan iyo Farsamo oo dhexmaray
JDS, Jamhuuriyadda Carabta ee Ma- » 236
sar.

DECREE N. 10 on 2th Apr. 1983, Instru-
ment of Ratification. » 238

مرسوم جمهورى رقم .١٠ الصادر فى ٢٤ أبريل ١٩٨٣ موثيقة التصديق	٢٣٩
XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 11 ee 25 Abr. 1983, Billad Maar Waddanini- mo ah oo lagu Maamusay Jaalle Ugaas Cabdullaahi Ugaas Maxamed.	» 240
XEER WASIIRKA WAS. MAALIYADDA, L. 3 ee 20 Abr. 1983, Lacag Xaashi Cu- sub.	» 241
XEER WASIIRKA WAS. MAALIYADDA, L. 4 ee 21 Abr. 1983, Canshuur ka dhaa- fid.	» 242
Maxkamadda G. W/Galbeed Hargeysa 88.2.83, lumid Jeeg War. Lr. 495509 ku qoran Belel Cali Jire.	» 242/bis
SOCIETA' AGRICOLA ITALO SOMALA- S.A/I.S.P.A. Ogeysiis isu yeerid shir caadi ahayn L. 1	» 243
SOCIETA' AGRICOLA ITALO SOMALA- S.A.A.S.-S.P.A. Avviso di Convocazio- ne di Assemelea Itraordinaria L. 2	» 244
SOCIETA' AGRICOLA ITALO SOMALA- S.A.I.S.- S.P.A. Ogeysiis isu yeerid shir caadi ah L. 3	» 245
SOCIETA' AGRICOLA ITALO SOMALA- S.A.I.S.- S.P.A. Avviso di Convocazio- ne di Assemelea Or/ria L. 4	» 245
SOCIETA' COMMERCIALE ITALO SOMA- LA -S.C.I.S. -S.P.A. Ogeysiis isu yee- rid shir caadi ah L. 5	» 246
SOCIETA' COMMERCIALE ITALO SOMA- LA -S.C.I.S. -S.P.A. Avviso di Convo- cazione di Assemele Ordinaria L. 6	» 247
SOCIETA' ROMANA IN SOMALIA -S.P.A. Ogeysiis isu yeerid shir caadi ah L. 7	» 248
SOCIETA' ROMANA IN SOMALIA -S.P.A. Avviso di Convocazione di Assemelea	» 249

QAYBTA KOWAAD

SHARCI

Sharci «Xeer Sharci lambar 1 ee 1.3.1983, kuna saabsan wax ka beddelid tacriifada Furdadaha.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: oggolaanshaha Guddiga
Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

MADAXWEYNAHA JDS

Sharciga soo socda:

(Qod. 1aad)

Waxaa loo rogay Sharci «Xeerka Sharci lambar 1 ee 1.3.1983, kuna saabsan wax ka beddelidda Tacriifa-da Furdadaha».

(Qod. 2aad)

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla maalinta uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaan lagu soo saara-ya Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 19 Abriil 1983

MADAXWEYNAHA JDS

(Maxamed Siyaad Barre)

QAYBTA LABAAD
X E E R

XEER SHARCI Lambar 3 ee taariikh 17 Maarso 1983,
Wax ku darid Sharciga hawlaha Difaaca Qaranka
(Sharci lam. 32 ee 28.4.81).

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 69aad ee Dastuurka JDS;

MARKUU ARKAY: Sharciga Tirsigiisu yahay 32,
soona baxay 28ka Abril 1981, kuna saabsan Haw-
laha Difaaca Qaranka;

MARKUU TIXGELIYHEY: In ay lagama maarmaan
tahay in Sharciga kor ku tilmaaman loo sameeyo
Xeer hoosaadka lagu fulinayo, laguna dhaqange-
linayo, sidaas darteedna loo baahan yahay in
awoodda soo saaridda Xeer-Hoosaadkaas la siiyo
Wasiirka Wasaaradda Gaashaandhigga, laguna
kordhiyo Sharciga qodob awooddaan bixinaya;

MARKUU TIXGELIYHEY: Baahida loo qabo in si deg-
deg loogu tillaabsado dhaqangelinta Sharciga kor
ku sheegan;

ISAGOO TIXGELIYHEY: Soo jeedinta Wasiirka Wa-
saaradda Gaashaandhigga;

ISAGOO DHEGEYSTAYNA: Golaha Wasaaradda.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeer Sharci ee soo socda:

(Qod. 1aad)

Sharciga tirsigiisu yahay 32, soona baxay 28kii
Abriil 1981, waxaa lagu kordhiyey Qodob cusub oo no-
qon doono Qodobka 15 bis, una qormi doona sida soo
socota:

— 235 —

Qod. 15 bis

Awoodda Xeer-Nidaamiyaha

Wasiirka Wasaaradda Gaashaandhigga wuxuu soo
saarayaa Xeer-Nidaamiye lagu hirgelinayo, laguna
fulinayo Sharcigan.

(Qod. 2aad)

Sharcigan wuxuu dhaqangelaya 15 maalmood
kaddib marka lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee
Jahuriyadda.

Muqdisho, 17 Maars 1983

MADAXWEYNAHA JDS
(Maxamed Siyaad Barre)

XEER MADAXWEYNAHA JIS L. 10 ee 2 Abriil 1983.

Heshiis Guud ee Iskaashi Dhaqan iyo Farsamo oo dhexmaray JDS iyo Jamhuuriyadda Carabta ee Masar.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Qod. 82aad xubintiisa 4aad iyo Qod. 72aad xubintiisa 1aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya;

ISAGOO ARKAY: Heshiiska Guud ee Iskaashiga Dhaqaale iyo Farsamo ee dhexmaray Dawladda Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Dawladda Jamhuuriyadda Carabta ee Masar, laguna kala saxiixday Muqdisho 29kii Maajo 1982;

- Mashruuca Heshiiska ee dhexmaray Dawladda Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Dawladda Jamhuuriyadda Carabta ee Masar, kuna saabsan Dhiirrigelinta iyo Badbaadinta Maalgelinta, laguna kala saxiixday Muqdisho 29kii Maajo 1982;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

(Qod. 1aad)

Dawladda Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, waxay meelmarisay Heshiiyada soo socda:-

- Heshiiska Guud ee Iskaashiga Dhaqaale iyo Farsamo ee dhexmaray Dawladda Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Dawladda Jamhuuriyadda Carabta ee Masar, laguna kala saxiixday Muqdisho 29kii Maajo 1982.
- Mashruuca Heshiiska ee dhexmaray Dawladda Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Dawladda Jamhuuriyadda Carabta ee Masar, kuna saabsan Dhiirrigelinta iyo Badbaadinta Maalgelinta, laguna kala saxiixday Muqdisho 29kii Maajo 82.

(Qod. 2aad)

Heshiisyadani waxay ku yeelanayaan Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya astaan Sharciyed, waxayna dhaqan geli doonaan markuu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

Xeerkan wax aalagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 2.4.83

MADAXWEYNAHA JDS

(Maxamed Siyaad Barre)

DECREE No. 10 on 2nd April 1983, Instrument of Ratification;

THE PRESIDENT

HAVING SEEN: Article 28 para 4, Article 72 para 1, of the Constitution of the Somali Democratic Republic;

HAVING SEEN: The General Agreement of Economic and Technical Co-operation, between the Government of the Somali Democratic Republic and the Government of the Arab Republic of Egypt, signed at Mogadishu 29th May 1982;

— The Project Agreement between the Government of the Somali Democratic Republic and the Government of the Arab Republic of Egypt, concerning Encouragement and Protection of Investment, signed at Mogadishu, 29th May 1982.

Hereby promulgates the following Decree:-

Article I

The Government of the Somali Democratic Republic hereby ratifies the following Agreements;

- The General Agreement of Economic and Technical Co-operation between the Government of the Somali Democratic Republic and the Government of the Arab Republic of Egypt, signed at Mogadishu 29th May 1982.
- The Project Agreement between the Government of the Somali Democratic Republic and the Government of the Arab Republic of Egypt, concerning Encouragement and Projection of Investment, signed at Mogadishu, 29th May 1982.

Article II

These Agreements shall have the force of Law in the territory of the Somali Democratic Republic; and shall enter into force upon signature by the President of the Somali Democratic Republic.

This Decree shall be published in the Official Bulletin of the State.

Mogadishu, 2.4.1983

PRESIDENT OF THE SDR
(Major General Mohamed Siad Barre)

مرسوم جمهوري رقم ١٠ الصادر في أبريل ١٩٨٣م وثيق التصديق

جمهورية الصومال الديمقراطية

الرئيس

بعد الاطلاع : على المادة ٨٢ الفقرة الرابعة والمادة ٧٢ الفقرة الأولى من دستور جمهورية الصومال الديمقراطية .

بعد الاطلاع : على الاتفاق العام للتعاون الاقتصادي والفنى بين حكومة جمهورية الصومال الديمقراطية وحكومة جمهورية مصر العربية الموقع في مقديشو بتاريخ ٢٩ مايو ١٩٨٢م .

على الاتفاقيات الخامسة بمشروع تشجيع وحماية الاستثمارات بين حكومة جمهورية الصومال الديمقراطية وحكومة جمهورية مصر العربية الموقع في مدينة مقديشو بتاريخ ٢٦ مايو ١٩٨٢م .

يصدر يرسم النافذ

المادة الأولى

تم التصديق على الاتفاقيات التالية :

أ — الاتفاق العام للتعاون الاقتصادي والفنى بين حكومة جمهورية الصومال الديمقراطية وحكومة جمهورية مصر العربية الموقع في مقديشو بتاريخ ٢٩ مايو ١٩٨٢م .

ب — مشروع اتفاق بين حكومة جمهورية الصومال الديمقراطية وحكومة جمهورية مصر العربية بشأن تشجيع وحماية الاستثمارات الموقع في مقديشو بتاريخ ٢٩ مايو ١٩٨٢م .

المادة الثانية

يكون للاتفاقين قوة القانون في جمهورية الصومال الديمقراطية، وينفذ هذا المرسوم حال توقيعه من قبل رئيس جمهورية الصومال الديمقراطية وينشر في الجريدة الرسمية للدولة .

— مقديشو أبريل ١٩٨٣م .

اللواء محمد سيد بارى

رئيس جمهورية الصومال الديمقراطية

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 11 ee 25 Abriil 1983,
Billad Maar Waddaninimo ah oo lagu maamuusay
Jaalle Ugaas Cabdullaahi Ugaas Maxamed.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 82aad ee Dastuurka JDS;

MARKUU ARKAY: Sharciga Lam. 65 ee 19ka Oktoober 1970;

MARKUU ARKAY: Talada Madaxda Guddiga XHKS ee Gobolka Shabeellada Dhexe, Xoghayaha XHKS ee Degmada Diinsoor iyo Guddiga Nabadjelyada iyo Difaaca Degmada Saakow;

MARKUU TIXGELIYAY: Hawlaha aad qiimaha ugu fadhiya Kacaanka uu muujiyay Jaalle Ugaas Cabdullaahi Ugaas Maxamed;

MARKUU AQOONSADAY: Inay lagama maarmaan tahay in dadka ku shaqeeyo muujinayo niyadsami, Kacaannimo, looga reebo raad wax ku ool ah;

MARKUU TIXGELIYAY: Talada Guddiga Abaalmarinta MJDS.

WUXUU SOO SAARAY

Xeerka soo socda:

Qodob Keliya

Waxaa lagu maamuusay Billad Maar Waddaninimo ah Jaalle Ugaas Cabdullaahi Ugaas Maxamed oo ka tirsan Nabaddoonnada Sare ee hawl aad u qiimo leh u qabtay dalka.

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa marka uu Madaxweynaha JDS soo saxiixo.

Muqdisho, 25 Abriil 1983

MADAXWEYNAHA JDS

(Maxamed Siyaad Barre)

XEER WASIIRKA MAALIYADDA, L. 3 ee 20 Abriil 83,
Lacag Xaashi Cusub.

WASAARADDA MAALIYADDA

WASIIRKA W. MAALIYADDA

MARKUU ARKAY: Qodobka 4aad ee Xeerka 6da
Maarso 1961 oo loo beddeley Sharciga 23ka Maarso
1961 Lr. 13 kuna saabsan nidaamka Lacagta Soo-
maaliyed;

MARKUÚ ARKAY: Qodobka 4aad ee Sharciga 5ta
Juunyo 1962, Lr. 2 kuna saabsan nidaamka sa-
meynta, soosaaridda iyo wareeg-gelinta xaashida
iyo tan cadadiga oo Shilin Soomaaliga;

MARKUU ARKAY: Xeerka Madaxweynaha Jamhuu-
riyadda Dimograadiga Soomaaliya, Lr. 67 ee 30kii
Disembar 1982;

ASAGOO TIÝGALLI: In lacagta kaydka ee 100, 50, 20,
10 iyo 5 shilin ayaa u hooseysa isagoo gartay Baa-
hida loo qabo in la gooyo taariikhda ay dhaqan
galayso Lacagtaasi.
Ayadoo uu soo jeediyyey Bankiga Dhexe ee Soo-
maaliya;

WUXUU SOO SAARAYAA

(Qod. 1aad)

Lacagta xaashida cusub ee 100, 50, 29, 10 iyo 5 shi-
lin oo tilmaamaheeda iyo summadaheeda farsamo lagu
carrifay Xeerka Madaxweynaha Jamhuuriyadda Di-
moqraadiga Soomaaliya, Lr. 67 ee 30kii Disembar, 1982,
waxay ka dhaqan geleysaa, kana soconeysaa dhulka
Jamhuuriyadda Dimograadiga Soomaaliya oo dhan la-
ga billaabo 21.4.1983.

Xeerkaani wuxuu Bankiga Dhexe ee Soomaaliya u
oggolaanayaa inuu lacagta uu wareeg-gelyo laga bil-
laabo taariikhda 21ká Abriile 1983.

Muqdsho, 20 Abriile 1983

WASIIRKA MAALIYADDA
(Dr. Cabdullaahi Axmed Caddow)

XEER WASIIRKA MAALIYADDA, L. 4 ee 21 Maars
1983, Canshuur ka dhaafid.

WASIIRKA MAALIYADDA

ISAGOO ARKAY: Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoc
raadiga Soomaaliya;

ISAGOO ARKAY: Sharei Lr. 14 ee 3.6.62 iyo ishedaa
ladii ka dambeeyay;

ISAGOO ARKAY: Arjiga ay soo goratay Shirkadda
Ayaan ee Caanaha, mac,macaanka iyo talajeedinta
Wasiirka Warshadaha;

ISAGOO ARKAY: Qodobka 17 ee sharciga canshuurta
toosan Lr. 5 ee 5.11.66;

ISAGOO ARKAY: In Warshaddu leedahay shuruudi
hiil sharcigu tilmaamay xagga canshuur dhaatika.

WUXUU GOOYAY

(Qod. 1aad)

Waxaa laga daayav Shirkadda Ayaan ee Caanaha
iyo mac-macaanka, canshuurta incaacihi uud
dhan 5 (shan) sano liga billaabo sanniyihi canshuur
ta 1983 ilaa 1987.

Canshuur dhaafku wuxuu ku kooban yahay ma
caashka ilaa 10% ee lacarta moalgelinta Warshadda,
sida ku cad Lr. 67nd ee Shareiga ceshihihi sooni;

(Qod. 2aad)

Shirkaddu waana kalo ee ay xaq u leedahay can
shuur dhaaf soo dejintu makiinadaha iyo qalabka lagu
dhisayo Warshadda, sida uu jideynayo sharei Lr. 26 ee
10.11.61.

(Qod. 3aad)

Xeerkana wuxuu dhaqan gelayaan markii uu saxiixo
Wasiirka Maaliyadda waana in loo gudbiyaa Hanti
dhawrka Guud si uu u diiwaangeliyo, laguna soo saa
raa Faafinta Rasmigaa.

Muqdisho, 21 Maars 1983

WASIIRKA MAALIYADDA

(Dr. Cabdullaahi Axmed Caddew)

Waan aragnay ee Diiwaangelinay

Diiwaanka Lamb. à Bogga Lamb. 18

Muqdisho, 21 Mar. 1983

Hantidhawraha Guud

QAYBTA SADDEXAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA
MID AH.

MAXKAMADDA G. W/GALLBEED HARGEYSA
MGH/4/83 Hargesa 28.2.83

UJEEDDO:- Cusbooneysiin Jeeg Wareega ee Lumay Lambar 495509 13.1.83 Sh. So. 50,000/= Laguna sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Hargeysa.

GUDDOOMIYAH MAX. G. W/G.

MARKUU ARKAY: Arjiga ku taariikhheysan 27.2.83 ee uu soo qortay Belel Cali Jire kuna saabsan in loo cusbooneysiyo Jeegga Wareega ee Lacagtiisa iyo Lambarkiisuba ay ujeedada ku qoran tahay oo ka Lumay.

MARKUU ARKAY: Caddaynta Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Hargeysa; kuna taariikhheysan 23.2.83 oo lagu caddeeyey taariikhda 12.1.83 loo sameeyey Bille Cali Jire, Jeeg Lambar 495509 Sh.So. 50,000/= (Konton kun Shillin);

MARKUU EEGAY: Qodobbada 69-70 Xeerka Lambar yahay 2, soona baxay 9.9.65.

WUXUU GO'AAMIYEH

In la kansal gareeyo Jeeggii Lumay, loona Cusbooneysiyo Jaalle BELEL Cali Jire, cusbooneysiinta na gacanta laga saaro Jaallaha kor ku xusan, 15 maal mood ka dib, maalinta Go'aankan lagu soo saaro Fafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimograadiga

WAXAA LA FARAYAA

Maamula Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Hargeysa, inuu ku dhejiyo nuqulka Go'aanka iridda Bankiga si ciddii haysata Jeeggii lumay ee kor lagu kansal gareeyey uga soo qortaan cabaasho haddii ay doonaan.

GUDDOOMIYAH MAX. G. W.G.
Ibraahim Faarax Maxamed

Kaaiyaha Maxkamadda G.W.Galbeed
Maxamed Jaamac Cigaal

SOCIETA' AGRICOLA ITALO SOMALA - S.A.I.S.-S.P.A.

Saldhigga: Muqdisho (J. D. Soomaaliya)

Raasumaal Sh. So. 1.200.000.-

OGEYSIIS ISU YEERID SHIR CAADI AHAYN

Sahmi qabayaasha Sharikadda Società Agricola Italo Somala -S.A.I.S. -S.P.A, waxaa la isu yeeray shirka caadi ahayn oo lagu qaban doono Lugano, Waddada Cantonale Lamb. 19, maalinta 15 Juunyo 1983 Saacadda 12 subaxnimo fachiga ugu horreeya, haddii taas suura geliwaayo, waxaa mar labaad la isu imaan doonaa maalinta 22 Juunyo 1983 isla saacadda iyo isla meesha sida kor ku qoran, si go'aan looga gaaro arrimaha soo socda:

ARRIMAHAD DOODDA

1- Soo jeedin talo in go'aan laga gaaro baabi'inta Shirkadda iyo magacaabidda Kharijiyaha.

Waxaa xaq u leh in ay Shirkadda ka soo qayb galan, sahmi qabayaasha ku qoran Buugga xubnaha Shirkadda shan maalmood ka hor maalinta fadhiba la qaban doono, oo aan ilaa waqtigaas dhigan sahmiyashooda saldhigga Shirkadda ee Muqdisho, amase Xafiiska Shirkadda oo ku yaal Itaaliya, waddada Cappucini, Lamb. 14, Milano, amase:

- Credito Italiano, Sede di Milano;
- Banco di Roma per la Svizzera Italiana, Lugano;
- Lemanik S.A., Via Cantonale, 19, Lugano.

IL CONSIGLIO DI AMMINISTRAZIONE

SOCIETA' AGRICOLA ITALO SOMALA -S.A.I.S. -S.P.A.

Sede sociale: Mogadiscio- Repubblica Democr. Somalia

Capitale sociale inter.versato Shs.So. 1.200.000.-

AVVISO DI CONVOCAZIONE DI ASSEMBLEA STRAORDINARIA

Gli Azionisti della Società Agricola Italo Somala-S.A.I.S. -S.P.A., sono convocati in Assemblea Straordinaria in Lugano, Via Cantonale n. 19, il giorno 15 Giugno 1983, alle ore 12, in prima convocazione ed, occorrendo, in seconda convocazione il giorno 22 Giugno 1983, nello stesso luogo ed alla stessa ora, per discutere e deliberare sul seguente.

ORDINE DEL GIORNO

1) Proposta di delibera per la messa in Liquidazione della Società ed eventuale nomina del Liquidatore.

Avranno diritto di partecipare all' Assemblea gli Azionisti iscritti nel Libro dei Soci almeno cinque o che entro tale termine abbiano effettuato il deposito delle loro azioni presso la Sede sociale in Mogadiscio o presso gli Uffici di Recapito della Società in Italia, Via Cappuccini, 14, Milano, oppure presso le seguenti casse:

- Credito Italiano, Sede di Milano;
- Banco di Roma per la Svizzera Italiana, Lugano.
- Lemanik S.A., Via Cantonale n. 19, Lugano.

IL CONSIGLIO DI AMMINISTRAZIONE

SOCIETA' AGRICOLA ITALO SOMALA -S.A.I.S. -S.P.A.

Saldhigga: Muqdisho (J. D. Soomaaliya)

Raasumaal Shs.So. 1.200.000.-

OGEYSIIS ISU YEERID SHIR CAADI AH

Sahmi qabayaasha Sharikadda Società Agricola Italo Somala S.A.I.S. -S.P.A., waxaa la isu Yeeray shirkka caa diga ah oo lagu qaban doono Lugano, Waddada Cantonale Lamb. 19 maalinta 15 Juunyo 1983 SAACADA 11, subaxnimo fadhiga ugu horreeya, haddii taas suura geliwaayo, waxaa mar labaad la isu imaan doonaa maalinta 22 Juunyo 1983 isla saacadda iyo isla meesha sida kor ku qoran, sii go'aan looga gaaro arrimaha soo socda:

ARRIMAHAD DOODDA

- 1) Warbixinta Guddiga Maamulka iyo Guddiga Baarista;
- 2) Sixid Wareejin maguurto;
- 3) Miisaaniyadda iyo Kharajka iyo Dakhliga ilaa 31 Diseembar 1982 iyo go'aannada la xiriira;

Waxaa xaq u leh in ay Shirkadda ka soo qayb galan, sahmi qabayaasha ku qoran Buugga xubnaha Shirkadda shan maalmood ka hor maalinta fadhiga la qaban doono, oo aan ilaa waqtigaas dhigan sahmiyashooda saldhigga Shirkadda ee Muqdisho, amase Xafiiska Shirkadda oo ku yaal Itaaliya waddada Cappucini 14, Milano, amase:

- Credito Italiano, Sede di Milano;
- Banco di Roma per la Svizzera Italiano, Lugano;
- Lemanik S.A., Via Cantonale n.19, Lugano.

GUDDIGA MAAMULKA

SOCIETA' AGRICOLA ITALO SOMALA -S.A.I.S. -S.P.A.

Sede sociale: Mogadiscio- Repubblica Democr. Somalia

Capitale sociale inter. versato Shs.So. 1.200.000-

AVVISO DI CONVOCAZIONE DI ASSEMBLEA ORDINARIA

Gli Azionisti della Società Agricola Italo Somalia -S.A.I.S. -S.P.A., sono convocato in Assemblea Ordinaria in Lugano Via Cantonale n. 19, il giorno 15 Giugno 1983, alle ore 11, in primo convocazione ed, occorrendo, in secondo convocazione il giorno 22 Giugno 1983, nello stesso luogo ed alla stessa ora, per discutere e deliberare sul seguente:

ORDINE DEL GIORNO

- 1) Relazione del Consiglio di Amministrazione e Rapporto del Collegio Sindacale;
- 2) Ratifica cessione immobiliare;
- 3) Presentazione Bilancio e Conto Perdite e Profitti dell' Esercizio chiuso al 31 Dicembre 1982 e deliberazioni relative.

Avranno diritto di partecipare all' Assemblea gli Azionisti incritti del Libro dei Soci almeno cinque giorni prima di quello fissato per l' Assemblea o che entro tale termine abbiano effettuato il deposit delle loro azioni presso la Sede sociale in Mogadiscio o presso gli Uffici di Recapito della Società in Italia, Via Cappuccini, 14, Milano, oppure presso le seguenti casse:

- Credito Italiano, Sede di Milano;
- Banco di Roma per la Svizzera Italiana, Lugano;
- Lemanik S.A., Via Cantonale n. 19, Lugano.

IL CONSIGLIO DI AMMINISTRAZIONE

L. 4

SOCIETÀ COMMERCIALE ITALO SOMALA -S.C.I.S.-
S.P.A.

Saldhigga: MUQDISHO — J. D. Soomaaliya

Raasumaal Shs.So. 5.000.000.-

OGEYSIIS ISU YEERID SHIR CAADI AH

Sahmi qabayaasha Shirkadda Società Commerciale
Italo Somala -S.C.I.S.-S.P.A., waxaa la isu yeeray shirka
caadiga ah ee lagu qaban doono Lugano, Waddada Can-
tonale Lamb. 19, maalinta 15 Juunyo 1983, saacadda
markay tahay 14, fadhiga ugu horreeya, haddii taas
suura galwaayo, waxaa mar labaad la isu imaan doo-
naa maalinta 22 Juunyo 1983, ISLA saacadda kor ku
qoran, sii go'aan looga gaaro arrrimaha soo socda:

BARNAAMIJKA DOODDA

- 1) Warbixinta Guddiga Maamulka iyo Guddiga Baarista;
- 2) Sixid Wareejin Maguурто;
- 3) Miisaaniyadda iyo Dheef Deynta la xiray 31
Diseembar 1982 iyo go'aannada la xiriira;
- 4) Dhicidda lambarka Guddiga Maamulka guud,
magacaabid Guddiga Maamulka iyo Guddiga Baarista.

Waxaa xaq u leh in ay Shirkadda ka soo qayb ga-
laan Sahmi qabayaasha ku qoran Buugga xubnaha
Shirkadda ilaa shan maalmood ka hor maalinta fadhi-
ga la qaban doono, oo aan ilaa waqtigaas dhigaan Sah-
miyaashooda saldhigga Shirkadda ee Muqdisho, amase
Xafiiska Shirkadda Società Agricola Italo Somalia ay kū
leedahay Milano, Waddada Cappuccini Lamb. 14, ama-
se:

- Credito Italiano, Sede di Milano;
- Banco di Roma per la Svizzera Italiana, Lugano;
- Lemanik S.A., Via Cantonale, 19, Lugano.

GUDDIGA MAAMULKA

SOCIETA' COMMERCIALE ITALO SOMALA -S.C.I.S.
-S.P.A.

Sede sociale: Mogadiscio- Repubblica Democr. Somalia
Capitale sociale inter. versato Shs.So. 5.000.000.-

AVVISO DI CONVOCAZIONE DI ASSEMBLEA ORDINARIA

Gli Azionisti della Società Commerciale Italo Somalia -S.C.I.S., S.P.A., sono convocati in Assemblea Ordinaria in Lugano, Via Cantonale n. 19, il giorno 15 Giugno 1983, alle ore 14, in prima convocazione ed, occorrendo, in seconda convocazione il giornoe 22 Giugno 1983, nello stesso luogo ed alla stessa ora, per discutere e deliberare sul seguente:

ORDINE DEL GIORNO

- 1) Relazione del Consiglio di Amministrazione e rapporto del Collegio Sindacale;
- 2) Ratifica cessione immobiliare;
- 3) Presentazione Bilancio e Conto Perdite e Profitti dell'Esercizio chiuso al 31 Dicembre 1982 e delibrazioni relative;
- 4) Nomina del nouvo Consiglio di Amministrazione, previa determinazione del numero dei suoi membri, e del Collegio Sindacale a norma di legge.

Avranno diritto di partecipare all' Assemblea gli Azionisti iscritti nel Libro dei Soci almeno cinque giorni prima di quello fissoto per l'assembla che entro tale termine abbiano effettuato il deposito delle loro azioni presso la Sede sociale in Mogadiscio o presso gli Uffici di Recapito della Società Agricola Italo Somalia in Italia, Via Cappuccini, 14, Milano, appure presso le seguenti casse:

- Credito Italiano, Sede di Milano;
- Banco di Roma per la Svizzera Italiana, Lugano;
- Lemanik S.A., Via Cantonale n. 19, Lugano.

IL CONSIGLIO DI AMMINISTRAZIONE

SOCIETA' ROMANA IN SOMALIA — S.P.A.

Saldhigga: Kismaayo — Jamhuuriyadda D. Soomaaliya

Raasumaal Shs.So: 2.000.000.-

OGEYSIIS ISU YEERID SHIR CAADI AH

Sahmi qabayaasha Shirkadda Società Romana in Somalia — S.P.A: waxaa la isu yeeray Shirka caadiga ah oo lagu qaban doono Lugano, Waddada Comunale, Lamb. 19, mäqlinta 15 Juunyo 1983, saacadda 9 subax-nimo fadhiga ugu horreeya, haddii taas suura geliwaayo waxaa mar labaad la isu imaan doonaa maalinta 22 Juunyo 1983, isla saacadda iyo isla meesha sida kor ku qoran, sii go'aan looga gaaro arrimaha soo socda:

- 1) Warbixinta Guddiga Maamulka iyo Guddiga Baarista;
- 2) Miisaaniyadda iyo Dheef Deynta la xiray 31 Disseembar 1982 iyo go'aannada la xiriira;
- 3) Magacaabid Guddi Maamul cusub, iyadoo lagu beddelayo Guddigii hore ee Maamulka, ee is casilay. Isla markaasna la xaddidayo cadadka xubniiisa, amä magacaabid Keli Maamule lagu wareejinayo awoddii Guddiga;
- 4) Buuxin Guddiga Baarista, kuwa is casilaan.

Waxaa xaq u leh in ay Shirkadda ka soo qayb galben Sahmi qabayaasha ku qoran Buugga xubnaha Shirkadda ilaa shan maalmood ka hor maalinta fadhiga lo qabben doono oo aan ilaa waqtigaas dhigaan sahmiyaashooda Saldhigga Shirkadda ee Kismaayo, amase Xafiiska Shirkadda Società Agricola Italo Somala ay ku leedahay Milano, Waddada Cappuccini 14, amase:

- Credito Italiano, Sede di Milano;
- Banco di Roma per la Svizzera Italiana, Lugano;
- Lemanik S.A., Via Cantonale n. 19, Lugano.

GUDDIGA MAAMULKA

SOCIETA' ROMANA IN SOMALIA — S.P.A.

Sede sociale: Kisimaio — Repubblica Democr. Somalia

Capitale sociale inter. versato Shs.So. 2.000.000-

AVVISO DI CONVOCAZIONE DI ASSEMBLEA ORDINARIA

Gli Azionisti della Società Romana in Somalia, S.P.A., sono convocati in Assemblea Ordinaria in Lugano, Via Cantonale n. 19, il giorno 15 Giugno 1983; alle ore 9, in prima convocazione ed, occorrendo, in seconda convocazione il giorno 22 Giugno 1983, nello stesso luogo ed alla stessa ora per discutere e deliberare sul seguente:

ORDINE DEL GIORNO

- 1) Relazione del Consiglio di Amministrazione e Rapporto del Collegio Sindacale;
- 2) Presentazione Bilancio e Conto Perdite e Profitti dell' Esercizio chiuso al 31 Disembre 1982 e deliberazioni relative;
- 3) Nomina del Consiglio di Amministrazione in sostituzione del Consiglio dimissionario, previa determinazione del numero dei suoi membri, oppure nomina di un Amministratore Unico e conferimento dei relativi poteri;
- 4) Integrazione del Collegio Sindacale in sostituzione di Sindaci dimissionari.

Avranno diritto di partecipare all' Assemblea gli Azionisti iscritti nel Libro dei Soci almeno cinque giorni prima di quello fissato per l' Assemblea o che entro tale termine abbiano effettuato il deposito delle loro azioni presso la Sede sociale in Kisimaio o presso gli Uffici di Recapito in Italia delle Società Agricola Italo Somala, Via Cappuccini, 14, Milano, oppure presso le seguenti casse:

- Credito Italiano, Sede di Milano;
- Banco di Roma per la Svizzera Italiana, Lugano;
- Lemanik S.A., Via Cantonale n. 19, Lugano.

IL CONSIGLIO DI AMMINISTRAZIONE